# SOMALI ANTI-PIRACY AGENCY

# WARBIXIN SANADEED

# 2012



**Guddoomiyaha Hay'adda**

**Md. Maxamed Cabdi Xasan (Afweyne)**

**HORDHAC**

Hay'adda la dagaalanka burcad badeeda ee Soomaalia waa guddi la dagaalamaya dhammaan hawlaha burcad badeednimada ah ee ka jira Soomaaliya, kaas oo uu Madaxweynihii hore ee Soomaaliya Sheekh Shariif Sheeikh Axmed uu Wareegto madaxweyne ku magacaabay bishii Juunyo ee sanadkii 2012-kii.

Burcad Badeednimada Soomaaliya waxay soo martay seddax weji, kuwaas oo qeexaya sida ay ku bilaabatay, sida ay ku korortay iyo sida ay saameyn culus oo naf iyo maalba leh ugu yeelatay dalka Soomaaliya iyo bulshada caalamka.

Laga soo bilaabo 1991-dii markii ay burburtay dowladdii Soomaaliya ee uu madaxweynaha ka ahaa Genaral Maxamed Siyaad Barre waxaa badda Soomaaliya dhibaato ka bilaabay maraakiib shisheeye kuwaas oo isugu jiray kuwa kalluunka xaalufinaya iyo kuwo sun duugaya, isma markaasna dhibaato u geystay bulshadii ay noloshooda ku tiirsaneyd kalluunka.

Maraakiibta kaluumeysiga ee shisheeyaha waxay bilaabeen in ay iska daldashaan oo xaalufiyaan kalluunka Soomaaliya iyaga oo aan ruqsad u heysan, waxayna ku xadgudbeen heshiisyadii caalamiga ahaa ee dhawrayey deegaan biyoodka Soomaaliya, kheyraadka badda, waxayna dhibaato u geysteen muwaadiniinta Soomaaliyeed ee baddan u kalluumeysi tagi jiray, kuwaas oo ay dil, burburin hanti iyo ka bililiqeysi kalluunka ay soo dabtaan isugu daray.

Kooxaha dembiyada abaabulan sameeya iyo shirkado shisheeye oo ku xiran dibadda iyo dagaal oogayaal gudaha ah ayaa bilaabay in ay deegaanada gobalada dhexe ku duugaan sun halis ah oo dhibaato u geysatay dadkii noloshooda, isla markaasna barakicisay dad badan oo reer xeebeed ahaa, kuwaas oo ka cararay kaddib markii Baddii ay ka nolol raadsan jireenna laga hor istaagay, deegaankiina sun lagaga subay.

! 3!

Weerarada ay maraakiinta shisheeye ku qaadeen kalluumeysatada Soomaaliyeed waxay saameeyeen shirkadihii kalluumeysiga Soomaaliya kuwaas oo gebi ahaanba xirmay kaddib markii badda la gali waayey iyo

bulshadii xeebta ku nooleyd oo xeebta ka barakacday kaddib markii laga hor istaagay in ay badda galaan.

Kaddib sanado badan oo dhibaateyntaas lagu hayey iyo inkiraadda ay deegaanadaas iyo dadkii ku noolaa inkirtay beesha caalamka waxay qeybaha kala duwan ee bulshada deegaanka, sida odayaasha dhaqanka, culumaa'udiinka, dhalinyarada, haweenka iyo ururada bulshadaba isla garteen in difaacu nafsi la sameeyo oo la iska difaaco maraakiibta shisheeye ee dhibaateyneysa dadka Soomaaliyeed, xeebahooda iyo kheyraadkooda. Waxaa si gaar ah loo go'aamiyey in la iska celiyo maraakiinta inta timaadda wax ka yer 10-12 km kaddibna kalluumeysatada Soomaaliyeed dhibaateyneysa.

Maraakiibta kalluumeysiga jariifta badda ku xaalufineysay iyo kuwa suntan duugaysayba waxay heysteen hub ay ku dhibaateynayeen kalluumeysatada Soomaaliyeed, iyagoo doomaha Soomaalida xabadeynayey marka ay ku soo dhowaadaan halka ay shabaagtu u daadsan tahay.



Weeraradaas oo kale waxaa lagu dilay tiro badan oo dadka Soomaaliyeed ee kalluumeysatada ah, waxaa lagu burburiyey doomahoodii iyo agabkoodii, kuwaas oo ay mararka qaar biyo kulul oo ay maraakiib shisheeye ku fureen badda ugu harqamayey.



Bulshada caalamka way ka aamustay in ay arrimahaas soo fara geliso oo dhibaatada laga daayo dadka Soomaaliyeed, waxaana sidaas biyaha Soomaaliya loogu duugay sun aad u badan, maraakiibta jariiftuna waxay gaareen kumanaan si arxan darro ah ula dhaqmaysay badda iyo dadka Soomaaliyeed.

Sidaas darteed, xaalufintii ay maraakiibta shisheeye badda ku hayeen iyo gabood falkii ay ku sameynayeen kalluumeysatada Soomaaliyeed ee tabarta yer waxay keeneen in ay is abaabulaan kooxo kallumeysato Soomaaliyeed ah oo ku dhisan difaacu nafsi, kuwaas oo hubka u qaatay in ay iska difaacaan cidda ku xadgudbeyso oo kaliya.

Kooxdaas isdifaacad ku dhisnayd ee maraakiibta shisheeyaha iska difaaceysay, waxaa taladeeda iyo dhisideeda gacan weyn ka geystay ganacsade Maxamed Cabdi Xasan (Afweyne) oo ka mid ahaa ganacsatadii ay shirkadahoodii kalluumeysiga si weyn u saameeyeen dhibaatada maraakiibta shisheeye ay geysanayaan.

**I. BURCAD BADEEDA HUBEYSAN**

Kaddib markii sanadihii 2005-2006 ay dagaallo aad u qaraar ka dhex bilowdeed qabqablayaashii Muqdisho iyo wadaadadii dalka, isla markaasna dagaalka uu ku fidey Muqdisho guud ahaa ayey Muqdisho ka baxeen in badan oo ka mid ah maleeshooyinki beelaha.

Bishii Juunyo 2006-dii ayaa si rasmi ah loogu dhawaaqay in Muqdisho laga qabsaday dagaal oogayaashii, kuwaas oo dhistay urur ay ugu magic dareen Isbaheysiga soo celinta Nabadda iyo la dagaalanka argagaxisada, kaas oo durba keenay in ay dagaal rasmi ah la galaan wadaadadii dalka.

Maxaakiimtii Islaamiga ahaa ee ay wadaadada maamulayeen ayaa taladii Muqdisho kala wareegay qabqablayaashii, kuwaas oo markii laga adkaaday dibadda u qaxay.

Arrinta waxay keentay in maleeshiyaadkii laga adkaaday ee dagaal oogayaasha ay hubkoodii iyo saanadihii ay la baxsadeen kula qamaamaan badda.



Maleeshiyooyinkan badda ku qamaamay kama mid aheyn dhalinyaradii loo aasaasay in ay badda ka difaacdaan maraakiibta shisheeye ee jariifta

jiida, balse way ka xoog iyo dhaqaale bateen oo waxay kala wareegeen xeebihii.

Dunida waxaa isaga qasmay cidda burcad badeed ah iyo cidda is difaaceysa, sidaas darteedna dadkii loo aasaasay in ay badda difaacaan way iska tanaasuleen oo way ka tageen xeebaha, sababta oo ah waxaa xeebihii yimid maleeshiyooyin ka awood badan, kana dhaqaale badan oo markab walba soo afduubeysa, taas oo meesha ka saartay hankie kalluumeysatada ee ahaa in la is difaaco.



***Sunta badda lagu shubay ee dadka iyo xoolaha ku dhamaadee:***



***Xoolihii ku dhamaaday sugta badda lagu aasay ee ay aaseen maraakiinta shisheeye:***

## II. DHISIDDII HAY'ADDA LADAGAALANKA BURCAD BADEEDA

Hay'adda la dagaalanka burcad badeeda waxaa la aasaasay bishii Juunyo 2011-kii, waxaana aasaaskiisa la go'aamiyey kaddib wada hadalo dhex maray Madaxweynihii hore ee Soomaaliya Shariif Sheekh Axmed, maamulka Ximan iyo Xeeb iyo dadka wax galka ah ee ka s! oo jeedda gobalka ee uu ka midka ahaa ganacsade Maxamed Cabdi Afweyne.



Hay'adda la dhisay 2011-kii wuxuu ka koobnaa bulshada ka soo jeedda deegaanada markaas dhibaatada burcad badeedu ka jirya, si loo heloi dadaalo gudaha ah oo arrinta lagu xalliyo.




Hay'adda kaddib markii ay shaqeynayeen ku dhowaad 8 bilood, ayna wadeen dadaalo ka socday halka ay hawlgalada burca badeedu ka socotay ayuu madaxweynihii hore ee Soomaaliya Md. Shariif Sheekh Axmed wuxuu ku soo saaray wareegto madaxweyne, taas oo lagu sharciyeeyey Hay'adda, isla markaasna ganacsade Maxamed Cabdi Afweyne loogu magacaabay guddoomiyaha Hay'adda.

## III. ABAABULKII BULSHADA

### 1. Kulankii Muqdisho

Kaddib magacaabista madaxweynaha Guddoomiyaha Hay'adda wuxuu bilaabay inuu kulankii ugu horeeyey u qabto bulshada gobalka ka soo jeedda, kulankaas oo Hay'adda uu ku casuumay hogaamiyeyaasha dhaqanka eek a soo jeeda bartamaha Soomaaliya, waxaana odayaasha laga codsaday in ay taageeraan dadaalka lagu joojinayo burcad badeedda si burcad badeednimada loogala dagaalamo gudaha.



Odayaasha dhaqanku waxay ku doodeen in marka laga soo tago walaaca beesha caalamka, aysan diyaar u aheyn in ay taageeraan qorshaha lagula dagaalamayo burcad badeeda taas oo ay sabab uga dhigeen in aan laga hadlin waxna laga soo qaadin dhibaatada lagu hayo badda Soomaalia, hase yeeshee guddigu wuxuu odayaasha ku qanciyey in marka hore dhalinyarada Soomaaliyeed laga joojiyo burcad badeednimada si markaas beesha caalamka loo waydiisan karo in ay ka joojiyaan maraakiibta badda xaalufineysa iyo kuwa suntan duugeysa. Odayaasha soojeedintaas way aqbaleen, waxayna si buuxda u taageereen Hay'adda.

Kulankan odayaasha iyo Hay'adda oo Muqdisho ka dhacay bishii Juunyo 2011-kii waxaa ka soo baxay qodobadan.

A) In ay odayaasha si buuxda u taageersan yihiin Hay'adda ladagaalanka burcad badeeda oo ka koobnaa 11 xubnood oo uu madax u yahay ganacsade Maxamed Cabdi Afweyne.
B) In Odayaasha dhaqanka ay deegaanada bartama Soomaaliya u raacaan Hay'adda si bulshada deegaanka iyo dhalinta burcad badeedaba looga dhaadhiciyo joojinta hawshaas.
C) In ay odayaasha shirarka iyo barnaamijyada wacyigelinta ah ee gobalka ka bilaabanayo kala qeyb galaan si dhalinta burcad badeeda noqotay looga dhaadhiyo in ay iska daayaan hawshaas guracan.

Kulankaas kaddib, dhammaan 11-kii xubnood ee Hay'adda waxay aadeen gobalka si ay u fuliyaan qorshihii ay degsadeen ee ahaa in dhalinyarada laga soo saaro burcad badeedda bulshadana dib loogu soo celiyo, si loo yareeyo halista.

**2. Shirkii Cadaado**

Xubnihii Hay'adda oo ay wehliyaan odayaasha dhaqanka qaarkood ayaa ka soo degay Deg. Cadaado, bishii Juunyo ee 2011-kii, waxayna maamulka Ximan iyo Xeeb ka codsadeen in ay u abaabulaan kulan ay bulshada qeybaheeda oo dhami ka soo qeyb galaan.

Maamulka Ximan iyo Xeeb wuxuu abaabulay kulankii, kaas oo ay ka soo qeyb galeen dhamaan qeybaha kala duwan ee bulshada oo ay ka mid ahaayeen Odayaasha dhaqanka, Culumaa'udiinka, Bulshada Rayidka, ururada haweenka, dhalinyarada, iyo Xubno maamulka ah.

Kulankii Cadaado waxaa ka soo baxay qodobo muhiim ah:

1. In bulshada oo dhan iyo maamulkaba ay si buuxda u taageeraan hawsha Hay'adda la dagaalanka burcad badeeda uu soo jeediyey.
2. In la wada cambaareeyo burcad badeednimada, isla markaasna laga wada shaqeeyo sidii dhalinta looga soo saari lahaa.
3. Ka qeybgalayaashii kulanka waxay wada ogolaadeen in ay Hay'adda kala shaqeeyaan in loo dhaqaaqo sidii dhalinyarada looga soo saari lahaa hawlaha burcad badeednimo ee ay ku jiraan, lana wacyigeliyo.
4. Maamulka ayaa laga codsaday inuu sii diyaariyo goobo lagu xareeyo oo lagu dhaqan celiyo dhalinyarada ka soo baxeysa burcad badeednimada.

Ugu dambeyntii kulankii wuxuu si buuxda u taageeray go'aanka guddoomiyaha Hay'adda Mudane Maxamed Cabdi Xasan uu ku gaaray inuu la dagaalamo burcad badeednimada, isaga oo ka faa'iideysanaya tixgelinta looga hayo gobalka.

Maamulka Ximan iyo Xeeb wuxuu balan qaaday inuu furayo xarumo lagu dhaqan celiyo dhalinta, kuwaas oo ay Hay'adda u adeegsan doonaan in ay ku xareeyaan kuwa ka soo baxay burcad badeednimada.

**3. Kulankii Hay'adda iyo madaxda burcad badeedda**

Guddoomiyaha Hay'adda la dagaalanka burcad badeeda wuxuu is isku dhaf ah u qeybiyey xubnihii Hay'adda iyo qeybihii bulshada eek u soo biiray, kuwaas oo uu u kala diray qeybaha kala duwan ee deegaanada xeebta si ay u bilaabaan wacyigelinta dhalinyarada.

! 12!

Guddoomiyaha Hay'adda iyo qaar ka mid ah xubnihiisana waxay wada hadalo toos ah la bilaabeen madaxdii burcad badeeda si ay ugu dhaadhiciyaan in ay aqbalaan shir guud oo dhex mara, Xubnaha Hay'adda, Qeybaha bulshada iyo madaxda burcad badeeda, kulankaas oo ujeedkiisa ahaa in madaxda burcad badeeda laga dhaadhiciyo in ay joojiyaan dhalinyarada ay badda u dirayaan.

Kulamo badan oo aan toos aheyn iyo xiriiro kala geddisan oo lala yeeshay madaxda burcad badeedda iyo dadaalo socday ku dhowaad labo bilood, guddigu waxay ku guuleysteen in ay kulan guud la yeeshaan kuwo ugu saameynta weynaa madaxda burcad badeeda, kuwaas oo lagala hadlay dhamenyta hawlaha burcad badeednimada.

Madaxda burcad badeedda waxay muujiyeen shakiga ay ka qabaan qorshaha Hay'adda, waxayna qaarkood ku adkeysteen in aysan joojineyn burcad badeednimada, laakiin ugu yeraan qaar ka mid ah ayaa furay fursad lagu wada hadlo kaddib markii ay meesha soo dhigeen su'aalo ay ku weydiiyeen Hay'adda waxa ay ku bedelanayaan joojinta burcad badeednimada, mustaqbalka dhalinta burcad badeedda marka ay iska joojiyaan burcad badeednimada.



Wadahadalo adag ayaa ka dhex bilowday xubnimihii Hay'adda iyo madaxdii burcad badeeda. Burcad badeedii waxay bilaabeen in ay ka hadlaan ammaankooda, cafis loo fidiyoiyo shaqo abuur si ay u joojiyaan burcad badeednimada.

Guddigii iyo bulshada qeybahaeedii la socday waxay burcad badeedda u sameeyeen balanqaadyo ay ka mid yihiin in la nabadgelinaayo, cafisna loo fidinaayo, lana dhaqan celinaayo oo bulshada dib loogu celinaayo haddii

ay si shuruud la'aan ah ku joojiyaan burcad badeednimada.
Qodobada uu Hay'adda u balan qaaday madaxda burcad badeedda kuwooda hawsha burcad badeednimada joojiya.

1. Cafis ay u fidinayaan Maamulka Ximan iyo Xeeb iyo dowladda Federaalka.

2. Damaanad qaad amni.
3. Dhaqan celin iyo tababaro xirfadeed.
4. Dib ugu celinta bulshada.

In ka badan 60% oo ka mid aheyd madaxdii burcad badeeda ee shirk aka qeyb gashay ayaa soo dhoweysay Hay'adda ladagaalanka burcad badeeda iyo qorshayaashii uu u sharaxay. Ku dhowaad 40% ayaa sidii kale qorshaha Hay'adda shaki ka muujiyey diidayna in ay aqbalaan si loo joojiyo burcad badeedda.
Ugu dambeyntii Hay'adda wuxuu heshiis la gaaray burcad badeedda kuwooda aqbalay soo jeedinta, waxayna kula heshiiyeen in ay burcad badeeda diyaarka u ah in ay hawshaas ka baxaan, waxaana qodobadaas ka mid ahaa:

**Shuruudaha**

1. In ay cambaareeyaan burcad badeednimada.
2. In ay si shuruud la'aan ah u soo wareejiyaan la heystayaasha ay heystaan.
3. In ay soo diiwaangeliyaan maleeshiyaadkooda, hubkooda iyo doomahooda.

**IV. FULLINTA QORSHAHA LAGU HESHIIYEY**



***Cadaado: Guddoomiyaha Hay'adda la dagaalanka Burcad Badeeda Md. Maxamed Cabdi Xasan Afweyne oo hadlaya maalintii sida rasmiga ah loogu dhawaaqay tanaasulaada ay Burcad Badeeda ka sameeyeen hawlihii ay ku jiree, kaddib markii hay'adda uu hoggaamiyo ee SAPA ay ku qancisay burcadda in ay ka tanaasulaan dhibaatada ay badda ku hayaan.***

Qeybo badan oo ka mid ah burcad badeedii waxay dib ugu laabteen kooxahoodii si ay ula tashadaan, waxayna kala soo laabteen jawaabo wanaagsan oo a ka mid yihiin in ay diyaar u yihiin in ay hubkooda iyo maleeshiyooyinka ku soo wareejiyaan Hay'adda iyo maamulka gobalka.

1. Burcad badeeda waxay si shuruud la'aan ah oo aan wax dhaqaale ah laga qaadan, kuwaas oo lagu soo wareejiyey Hay'adda.
2. Waxay soo diiwaan geliyeen, hubkooda, maleeshiyaadkooda iyo doomahooda.
3. Waxay joojiyeen hawlgaladii burcad badeeda, maleeshiyadoodiina waxay ku wareejiyeen maamulka iyo Hay'adda.

**1. Kulamadii dowladda.**

Hay'adda, markii uu ku guuleystay inuu burcad badeedii qaar ka saaro hawshii ay ku jireen kana soo daayey dadkii ay haysteen ayuu laheystayaashii la soo daayey ku wareejiyey dowladda Soomaalia, dowladda ayaana si rasmi ah u siideysay la haystayaashaasi oo ahaa lix qofood oo oo labo mar la kala daayey.

Hay'adda wuxuu qabanqaabiyey kulan dhexmaray Xafiiska Ra'iisal wasaaraha iyo kooxihii burcad badeeda ahaa ee ogolaaday in ay burcad badeednimada joojiyaan madaxdooda, kulankaas oo looga gol lahaa in dowladda loo damaanad qaado in ay dhalinyaradaas ka soo laabteen burcad badeednimo Soomaaliyana ay ka hareyso ceebta caalamiga ah, halka madaxda burcad badeedana loo xaqiijinaayey damaanad qaadka amni ee loo balan qaaday.

**2. Tirada burcad badeeda ee isa soo dhiibtay**

Kaddib sanad iyo bar oo shaqo adag ah, Hay'adda waxay ku guuleysteen inay soo xareeyaan 932 dhalinyaro ah oo si toos ah ugu lug lahaa burcad badeednimada.

**2. Guulaha la gaaray**

1. Tiro 932 burcad badeed ah ayaa hawshii laga joojiyey, dhaqan celin loo xareeyey.
2. Maamulka Ximan iyo Xeeb wuxuu furay labo xer oo waaweyn, kuwaas oo lagu dhaqancelinayo dhallinyaradii burcad badeeda noqotay.
3. Qeybaha bulshada oo ay ka mid yihiin culumaa'udiinka, odayaasha, haweenka, macalimiinta iyo ururada bulshada ayaa si mutadawacnimo ah u dhaqan celinaya dhalinta la soo xareeyey.

**Xerooyinka**

1. Xerada Cadaado
2. Xerada War Shubo
3. Xerada Ceel Huur
4. Xerada Camaara

**Madaxdii booqatay xerooyinka lagu hayo dhalinta burcad badeedda laga soo saaray**

Xerooyinka lagu dhaqancelinayo dhalinta burcad badeednimada laga soo saaray waxaa ka mid ah:

1. Ra'iisa wasaaraha Soomaaliya Md. Cabdi Faarax Shirdoon Saacid
2. Guddoomiye Kuxigeenka Baarlamaanka Md. Jeylaani Nuur Iikar
3. Wasiirka arrimaha gudaha Md. Cabdikariin Xuseen Guuleed
4. Wasiirka Gaashaan dhiga Md. Cabdixakiin Xaaji Faqi
5. Taliyihii ciidanka Xooga dalka Soomaaliyeed Md. Cabdulqaadir Sheekh Cali Diini
6. Xildhibaano tiro badan

**Doorka maraakiibta NATO**

Maraakiinta NATO iyo dalal badan oo kale ka socota door wanaagsan ayey ka ciyaareen wax ka qabadka burcabadeedda, waxayna yareeyeen

weeraradii la qaadayey, balse dadaalka Hay'adda uu gudaha ka qaaday la'aantiisa waxba ma suuroobi karin.

Guddigu wuu amaanayaa doorka maraakiibtaasi eek u kacay 18-ka Bilyan ee dollar, anaga waxaan caddeyneynaa in aysan xitaa nagu qaadan 18 milyan oo dollar in aan dhalinta ka saarno hawsha halista ah, balse waxay u baahan tahay in ay dowladda Soomaaliya iyo beesha caalamka si dhab ah u soo garab istaagaan Hay'adda.

**Talo soo jeedin**



Kaddib markii Hay'adda SAPA ay hawshan soo waday muddo ku dhaw labo sanadood, isla markaasna guulo lagu faani karo ka keentay xallinta dhibaatadii burcad badeeda waxay soo jeedineysaa:

1. In dowladda Soomaaliya ay xoojiso taageeradda Hay'adda la dagaalanka Burcad Badeeda ee dhanka qarashaadka iyo tasiilaadka ka le, si aysan hawsha u galin habcsanaan.
2. in Maamulada deegaanka ka jira lagu taageero sidii ay mashaariic yar yar ugu abuurmi lahaayeen deegaanka si dhalinyarada loogu mashquuliyo hawlo shaqo ama wax barasho.
3. In Hay'adaha gargaarka ay booqdaan xerooyinka lagu hayo dhalinyarada laga soo reebay burcad badeednimada ee la doonayo in dhaqancelin iyo waxyoi gelin loo sameeyo isla markaasna bulashada dib loogu celiyo, tiiraanyo bixinna loo sameeyo maadaama ay walwal badan qabaan oo u baqayaan mustaqbalkooda.
4. In la isku xiro, iskaashina laga sameeyo hawlaha la dagaalanka

burcad badeedda ee gudaha ka socda, waa Hay'adda SAPA iyo hawlgalada badda ka socda ee EUNAFOR ee xeebaha Soomaaliya ku sugan si iskaashigaasi uu u suurto geliyo in laga adkaado burcad badeeda.

5. In aan la lumen fursadda dahabiga ah ee ay Hay'adda SAPA suurto gelisay ee ah in 932 dhalinyaro oo burcad badeed ahaa inta laga soo celiyey burcad badeednimadii iyaga oo tanaasulay ku xareysan yihiin xerooyin dhawr ah, taas oo keeni karta in ay dib badda ugu laabtaan dhibaato kale sidaas ku geystaan.

6. In dowladda ay abuurto qorshayaal dhalinyaradan dib loogu celinayo bulshada xoogoodana looga faaiideysan karo si wanaagsan, taas oo ay ka mid tahay in qaarka awooda ciidan laga dhigo, qaarkii doonaya in xirfado la baro ay fursadaas helaan, qaarkii dib u bilaabaya kalluumeysigoodiina dib loogu abuuro fursado ay ku abuurtaan shaqo.

**MOHAMED ABDI HASSAN**

**Guddoomiyaha,**

**Hay'adda la dagaalanka burcad badeedda Soomaaliya**

*Cellphone: +252615955575*

*Email: info@antilpiracy.org.so*

*Website: www.antilpiracy.org.so*